

# **Xuquuqdaada Hoosimaanaysa Bayaanka Xuquuqda Rukumada Federaalka iyo Minnesota ku Midaysan**

## **Inta Aadan Akhrisan Dukumiintigaan Waa In Aad Ogaatid:**

Dukumiintigaa, ereyga “adiga” waxa ku jira adiga, wakiilkaaga, iyo qof kasta ee sharci ahaan loo magacaabay in uu ku metelo sida u sharciga Minnesota qorayo. Haddii aad tahay degganaha guriga daryeelka, seexatid guriga daryeelka, ama rugyo daryeelka laga dhigay ee kale, waxa aad xaq u leedahay xuquuqyadaan. Waxa kale ee aad xaq u leedahay xuquuqyadaan haddii aad kujirti guri ama seexatid guri ama rug korka laga ilaaliyo ee barnaamij kiimikada lagu daaweynayo ee Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota shati ka haysata. Lama oggola in rug ay ka codsan karto in aad xuquuqyadaan ka tanasushid ayadoo shuruud looga dhigayo gelitaanka ama joogista rugta.

Jiritaanka xuquuqyada qaarkood ayaa sharciga Minnesota keliya hoosimaanaya. Xuquuqyadaan waxa ay u daabacanyihiin far aad u muuqata. Xuquuqyada kale ee idil waxa ay hoosimaanaya sharciga federaalka iyo waxa ay quseeyaan degganayaasha shahaadada ee hoosimaanaya barnaamijyada Medicaid iyo Medicare. Haddii xaqaaga hoosimaanaya sharciga Minnesota uu u dhigmo xaqa hoosimaanaya sharciga federaalka, sharciga federaalka ayaa la hormarinayaa. Wixii kale ee dheeraada ee macna leh ee sharciga gobolka hoosimaanaya, haddana waxa lagu soo banghigayaa daabaacad adag.

Haddii aad doonayso nuqulka dhammaystiran ee xuquuqdaada Minnesota, waxaa jira nuqullo rugtaada ku diyaarsan. Qof shaaqaale ah ayaa kuu sheegi kara meesha aad aad ka heleysid.

## **Tayada Noloshaha**

Rugtu waa in ay kugu daryeesho qaab iyo jaawi hormarinaya kugu haynaya sida aad tahay ama kor u qaadaysa tayada noloshaada

**1. Sharafka.** Rugtu waa in ay su xushmad ku hormariso iyo kugu daryeesho qab iyo jawi kugu haynaya sida aad tahay ama kor u qaadaya sharadftaada iyo si buuxda aqoonsigaaga iyo jiritaankaaga shakhsi ahaaneed u xushmeyso. **Waxa aad xaq u leedahay daawaynta gaarka ah iyo daryeelka shakhsiyeed (ay ku jiraan in laga hadlo kiiska, wadatashiga, baaritaanka, daawaynta, iyo hawlaha fayadhawrka sida isticmaalka suuliga iyo qubeyska) marka laga reebo baahi ka jirta ammaankaaga iyo gargaarkaaga.**

**2. Isku Fillaanshaha iyo Ka Qeybqaadashada.** Waxa aad xaq u leedahay in aad dooratid hawlaha, jadwallada, iyo daryeelka caafimaadka; la maacaamilootid xubnaha jaalliyaddaada; iyo ka samaysatid doorashooyin aad noloshaada u rabto rugta ee adiga muhiim kuu ah. **Waxa aad xaq u leedahay in aad ka qeybqaadatid hawlaha ganacsiga, diinta, siyaasadda iyo kooxaha jaalliyadda, ay ku jirto in aad kuwo kale kula biirtid si aad uga wada shaqeysaan hagaajinta daryeelka**

**muddada dheer, ayadoon aysan faragalin kaaga imaanayn xaqa gaar ahaanshaha ee degganayaasha kale**

**3. Ka Qeybqaadashada Kooxaha Degganaha iyo Qoyska.**

Waxa aad xaq u leedahay is-abaabul iyo ka qeybqaadashada kooxaha rukunka ee rugta. Qoyskaaga waxa uu xaq u leeyahay in uu si gaar uu rugta kuula kulmo qoysaska rukamada kale ee rugta deggan. Marka uu rukun ama kooxda qoyska ay jiraan, rugta waa in ay dhegaysato aragtida iyo ku dhaqaaqdo in ay wax qabato cabashooyinka iyo soo jeediso go'aamada talooyin iyo hawlgallo saameynaya daryeelka rukunka iyo nolosha rugta. **Guddiyada degganaha iyo qoyska waa in lagu dhiirrigaliyo in ay talooyin la xariira qaawaniinta rugta soo jeediyaan.**

**4. Ka Qeybqaadashada Hawlaha Kale.** Waxa aad xaq u leedahay in aad ka qeybqaadatid hawlaha bulshada, diinta, iyo kuwa jaalliyadda ee soo faragalinayn xuquuqda degganayaasha kale ee rugta deggan.

**5. Tixgelinta Adeegyada aan laga Marmiin.** Waxa aad xaq u leedahay in aad degganato iyo hesho adeegyada rugta ee dayactir caqgligal ah ee baahidaada iyo dooqaada, laga reebo marka caafimaadkaaga iyo ammaankaaga ama midda degganayaasha kale ay halis galayso.

**Daryeelka iyo Daawaynta**

**6. Daryeelka Ku Habboon.** Waxa aad xaq u leedahay in lagu siiyo daawaynta iyo daryeelka caafimaadka kugu habboon ee

baahidaada shakhsiyeed, taaso loogu talagalay in ay kuu suurto galiso in aad ku gaartid heerka ugu sarreeya ee waxqabadka jireed iyo garasahada maskaxeed, balse xuquuqdaan waxa ay ku koobantahay meesha adeegyada aanan lagu bixinayn ilaha guud ama kuwa gaarka.

**7. Cilaaqaadka lala leeyahay Adeegyada Kale ee Caafimaadka iyo Sahaybixiyeyaasha. Waxa aad xaq u leedahay in aad adeeyo ka hesho daryeele dibadda ka imaanaya iyo aad ku hesho qoraal aqoonsiga daryeelaha, cinwaankooda, iyo sharaxaadda adeegyada. Waxa aad xaq u leedahay in aad iibsatid ama kireysatid badeecada ama adeegyada aan ku jirin caddadka kharashka maalmeed ee daryeele aad dooratay waa haddii usan sharciga sidaa ku farin.**

**8. Si Wadidda Daryeelka. Waxa aad xaq u leedahay in lagugu daryeelo si caqligal ah ee joogto ah iyo ay sii wadaan shaqaalaha u xilsaaran hawsha illaa inta ay qawaaniinta rugta oggolyihiin.**

**9. Dib lagu Eego Diiwaanka iyo Aqoonta Daryeelka Loo Leeyahay. Waxa aad xaq u leedahay in aad eegtid xogtaada oo idil muddo 24 saac gudahood sidaa aad ku codsatay iyo aad iibsatid nuqullada caddad aan ka badnayn midka caadiga ah ee jalliyaddaada kaddib marka aad qoraal ku codsatid iyo la socdo ogaysiiska 2 cisho ee shaqada rugta. Waxa aad xaq u leedahay in aad si buuxda lagugu wargeliyo luqad aad fahmi kartid ee xaaladda caafimaadkaaga guud ku sugantahay.**

**10. Dardaaranka Daawaynta Quseeya.** Waxa aad xaq u leedahay in lagu siiyo macluumaad qoraal ah ee dardaaranka (hadda loo yaqaanno dardaaranka daryeelka caafimaadka ee Minnesota), ay ku jiraan rugta qawaaniinteeda iyo sharciyada lagu fulin karo, iyo dardaaranka daawaynta lagu sii dhiso. Waxa aad xaq u leedahay in aad u xilsaarto qof aad aydan qaraabo kula ahayn in uu qaato booska qofka qaraabada si uu go'aanka daryeelka caafimaadka ugu sameeyo.

**11. Dhakhtarka Ku Daawaynaya.** Waxa aad xaq u leedahay in aad dooratid dhakhtarka ku daawaynaya. Rugtu waa in ay ku siiso magacisa ama magaceeda, xirfadda, cinwaanka meherada iyo lambarka telefoonka.

**12. Macluumaadka Daaawaynta ku Taxluqa.** Waxa aad xaq u leedahay in lagu sii sheego waxa daryeelkaaga iyo daawayntaada ku taxluqa. Waxaa sii dheer in, dhakhtarka ku daawaynayo laga rabo in uu ku siiyo macluumaadka buxa iyo xaaladda hadda ka jirta cudurkaaga, daawayntaada, waxa duwan, haslisyadaada, iyo sida uu cudurka kuu qaban doono. Macluumaadkaan waa in lagugu siiyo ereyo iyo luqad la filayo in aad si caadi ah u fahimi kartid. Waxa dhici karta in u uku wehliyo xubin qoyska ka tirsan ama wakiil kale ee la doortay, ama labadaba. Waxa aad xaq u leedahay in aad macluumaadkaan diiddid. Haddii uu ku hayo xanuun nooca kaansarka naaska, waa in si buuxda laguugu sheego in ay jirto doorashoduwan ee daawayn waxtar fiican iyo halisyada la xariira qaababkaas.

**13. Ka Qeybqaadashada Qorsheynta Daawaynta.** Waxa aad xaq u leedahay in aad qorsheynta iyo daawaynta ka qeybqaadatid. **Xaqqaan waxaa ku jira ah fursad aad kagala hadashid daawaynta iyo wax duwan ee daryeelaha daryeelka la yeelatid, fursadaha aad ku codsanaysid iyo kaga qeybqaadanaysid fadhiga daryeelka rasmiga ah, iyo xaqa aad ku dari kartid xubin qoyska ah ama wakiil kale aad adiga dooratay in lagu daro kulamadaas.**

**Haddii aad miyirbeeshid, suuxdid, ama lagu fahmiwaayay marka aad rugta soo galaysay, rugtu waa in ay dadaal cagligal ah u maro si ay ku ogaysiiso xubin qoyska ah ama qof aad adiga qoraal ku magacaawday in ahaado qofka xaaladda degdegga ah lagala xariirayo, iyo aad qofkaa u oggolaatid in uu ka qeybqaato qorshaha daawayntaada, sida uu sharciga gobolka qorayo.**

**14. Ogaysiiska Isbaddallada Xaaladdaada.** Rugtu waxaa sharcdi ku ah in ay sida ugu dhaqsiyo badan kuula tashato marka uu jiro shil aad ku dhaawacantay, isbaddal weyn ee soo gaartay jirkaaga, maskaxdaada, ama xaaladdaada dhaqanka nololeed, iyo loo baahanyahay in si weyn loo baddalo daawayntaada, ama la gaaro go'aan ah in rug lagugu wareejiyo ama rugta lagaa saaro. Rugtu sidoo kale waa in ay la xariirto dhakhtarkaaga, wakiilkaaga rasmiga ah, iyo xubinta qoyskaaga.

**15. Diidmada Daawaynta.** Waxa aad xaq u leedahay in aad daawaynta diidid. **Haddii aad diidid daawaaynta, daawda, ama cuntada lagaa reebay in aad cuntid, waxaa shardi ah in lagu sheego suurto galnimada xaalado caafimaad ama ama**

**isbaddal nolosha kicisa ay ka yiimaadaan diidmada, kuwaaso ay la socdaan warbixin xogta caafimaadkaaga.**

**16. Isku Fillaanshaha Daawa Qaadashada.** Waxa aad xaq u leedahay in aad iskaa u maamulatid qaadashada daawooyinka haddii guddiga dishibliinka rugta maasmusha ay ka arrimisay in caadadaan ay nadabgalyo tahay.

## **Xuquuqda Guud**

Xaq ayaad u leedahay jiritaan karaamo, madax bannaani, iyo xog-ishdaafsi leh iyo la xaariiri kartid dadka iyo adeegyada rugta gudaheeda iyo dibaddeeda. Rugtu waa in ay difaacdo iyo hormariso xuquuqdaada, ay ku jiraan xuquuqyada hoos ku qoran. **Waxaa shardi ay ahayd in markii rugta lagu soo galinayay in lagu sheego xuquuqda aad sharciga u leedahay ee aad baadbaada lagu sheegay bayaankaan qoraalka ah.**

**17. Istimcaalka Xuquuqda.** Waxa aad xaq u leedahay in aad xuquuqdada ugu isticmaalatid deggane ahaanta rugta iyo sida ka muwaaddinimada ama deggane Maraykanka sharci ku jooga iyo xor ka haatid faragalin, cagajuglayn, takoorid, ama argoosiga rugta marka aad xuquuqdaada isticmaalatid. Haddii ay run tahay in aadan masuuliyad qaadi karin sida uu sharciga Gobolka sheegayo, xuquuqdaada waxaa la wareegaya qofka uu Gobalku u magaacaabay in uu adiga ku metelo. Haddii aanay run ahayn in aadan masuuliyada qaadi karin, qof kasta ee sharci ahaan ku metelaya oo uu Gobolka magacaabay ayaad dhici karta

in uu xuquuqdaada isticmaalo illaa iyo inta uu sharciga gobolka uu qorayo.

**18. Lihidda Gaarahaanshaha Shakhsiyeed.** Waxa aad xaq u leedahay mudnaansha kaasta ee waxa gaar ahaanshahaaga, shakhsiyaddaada, iyo aqoonsiga hiddahaaga taaso ku xiran xaaladdaada bulshadeed, diimeed, iyo isku aruursanaanta nafsi ahaaneed. Shaqaalaha rugta waa in uu albaabka ka hoodiyeeyo inta uusan soo galin, marka laga reebo xaalad degdeg ah ama marka ay caddatahay in ay suurtagal ahayn.

**19. Helitaanka Rasiidyada Xuquuqda.** Waxa aad xaq u leedahay in lagu siiyo inta aan lagu qaabilin ama marka lagu qaabilayo war ahaan iyo qoraal ahaanba, labadaba, luqad aad fahmayso bayaanka xuquuqdaada iyo xeeraarka maamulaya sida aad ugu noolanayso rugta. Waa in aad rasiid qoraal ah ku oggolaatid, macluumaad kasta ee lagu saxay.

**20. Macluumaddka Medicaid iyo Medicare ku Taxluqa.** Waxa aad xaq u leedahay in lagu siiyo, marka lagu qaabilayo ama marka aad noqoto in aad u qalantid Medicaid, bayaan qoraal ah ee shayada iyo adeegyada ku jira adeegyada daryeelka rugta sida uu qorshaha Gobolka qorayo (kuwaaso ay dhici karto in aan kharash lagugu soo dallacayn) iyo sheeyo iyo adeegyo kastas ee meesha laga bixiyo (iyo kharashkooda) kuwaaso lagugu soo dallici karo, ay ku jiraan kharashyada adeegyada aysan Medicare iyo Medicaid kabayn cadadka rugta kharashkeeda ee maalin kasta. Waxa aad xaq u leedahay macluumaad qoraal iyo mid war ee ku taxluqa sida loogu dalbanayo iyo loogu isticmaalyo Medicare iyo Medicaid, ay ku



jirto ay ku jirto sida inta ay la egtahay hantidaada ay u saamaynayso u qalmiddaada Medicaid, ay ku jiraan sida lagugu soo celinayo qaansheegoyin hore oo ay nafciyadaa kabayayaan. **Waxa aad xaq u yeelatay in shaqaalaha rugta ay kugu caawiyaan in aad heshid macluumaadka ah haddii barnaamijka Medicare ama Medicaid ay bixinayaan wax un adeegyada ah ama adeegyadaan oo idil.**

Adiga ama akaawnkaaga shakhsiyeed, midkiinna looma qaansheegan karo haddii adeegyadaas ay yihiin adeegyo ay Medicaid ama Medicare bixinayaa. Adeegyadaan waxaa ka mid ah adeegyada daryeelka, adeegyada cuntada, hawlaha barnaamijyada, adeegyada nadaafadda iyo haynta, adeegyada caafimaadka bulshada la xariira, iyo shayada fayadhowrka joogtada ah ee shakhsiyeed iyo adeegyada shardiga ah si aad baahiyadaada ku qancisid.

“Shayada nadaafadda shakhsiyeed iyo adeegyada” waxaa ka mid ah:

- nadaafadda timaha, saadka, shanlada, buraashka, timajaraha, iyo kareemka timaxiirka,
- saabuunta qubeyska, saabuunta fayadhowridda ama qalab u khaasa fayadhowrka marka lagu taliyay in siidasi lagu daaweynayo ama looga hortagayo caabuqa maqaarka,
- cadayga, daawada ilkaha, waxa ilkaha iskuhaya, nadiifiyaha ilkbeenaadka, iyo dunta ilkaha lagu safeeyo,
- kareemka jirka,
- waraaqaha nadaafadda, suufka kuusan, suufka dheecaanka,
- carfiyaha,

- qalabka kaadida faka a celiya, saadka waraaqaha fayadhowrka iyo waxa la xariira,
- shukumaannada, shukaammanada qubeyska, calallada isbitaalka,
- daawada qorista u bahnayn,
- fayadhowrka timaha iyo ciddiyaha,
- qubeyska, iyo
- dhardhaqiida aasaasiga ee shakhsiyeed.

Waxa dhici karta in kharash lagugu soo dallaco shayada iyo adeegyada aysan Medicaid iyo Medicare kabayn, ay ka mid yihiin:

- telefoonka, telefshinka, ama raadiyaha qolkaaga,
- shayada nafta u raaxeeya, ay ku jiraan qalabka siigaarka lagu cabo, waxyaabaha yaryar ee la xiiseeyo, iyo macmacaanka,
- shayada bilicda iyo quruxda iyo adeegyada dhaafsiisan kuwa ay kharashkooda bixiyeen Medicaid ama Medicare,
- dharka shakhsiyeed,
- qalabka akhriska shakhsiyeed,
- haddiyadaha, ubaxa, geedaha,
- Xafladaha bulshadeed iyo madadaallada ka baxsan hawlaha barnaamijka,
- Adeegyada daryeelka qaaska ah sida kalkaaliyeyaalka ama caawiyeyaasha gaarka ah,
- Qolalka gaarka ah, marka laga reebo ku caafimaad ahaan loo baahanyahay, (sida qolka gaarka ee faafidda cudurrada lagu ilaalinayo), iyo
- Cuntooyin loo diiyariyay si qaas ah si duwan aan la mid ahayn midda rugta laga bixiyo.

**21. Ogasiiska Ay Dhacayso In Aad Mudnaashaha Medicaid Ku Weyso.** Haddii aad nacfiyada Medicaid qaadatid, rugtu waa in ay kula socodsiiiso marka lacagta akaaynkaaga ku hartay ay gaarto wax \$200 ka yar xuduudka u yaalla ilaha SSI halkii qof, iyo marka, haddii lacagta ku jirta ilahaaga ee aan ka reebanaanta ku jirin, ay gaaraan xuduudda ilaha SSI ee hal qof loogu talagalay, waxaa dhici karta in aad meesha mudnaanshaha Medicaid ama SSI ku weydid.

**22. Lacagta Aad Leedahay.** Waxa aad xaq u leedahay in aad arrimaha lacagtaada aad maamulatid iyo lagaa rabin in aad lacagtaaga rugta ku keydsatid. Kaddib marka oggolaashahaaga qoraalka ah la helo, waxa aad xaq u leedahay in lacagtaada (haddii ay rugta kugu keydsantahay) in la ilaaliyo iyo si gaar loo xisaabiyo. Wixii lacag ah ee \$50 ka badan waa in rugtu dhigto akaawn gaar ah ee korsaar dhalinaya ee baxsan rugta akaawnada ay maamusho, in korsaarka ka dhasha la dhigo akaanwkaaga. Rugtu waxa ay hayn kartaa lacagtaada ee ka badnayn \$50 ee lagu haynayo akaawn aan korsaar curinayn, lacag diyaar ah, akaawn korsaar curinaya. Xogtaada lacagta waa lagu siiyo marka aad sidaa ku codsatid ama uu wakiilkaaga rasmiga ku codsado, **waa in ugu saddexdii biloodba mar lagu siiyo.** Haddii aad dhimatid, lacagtaada iyo xisaabta u dambeeya waa in la isugu keeno muddo 30 cisho gudahood ee loo gudbiyo shakhsiga ama cidda sharci ahaan u maamuusha hantidaada.

**23. Tijaabada Cilmibaarista.** Waxa aad xaq u leedahay in aad diiddo ka qeybqadashada tijaabada cilmibaarista.

**24. Baddalashada qolka iyo qofka aad qolka wadaagtaan.**

Waxa aad xaq u leedahay in lagu sheego marka uu isbaddal ka dhacayo qolka ama qofka qolka kula deggan. **Haddii qolka lagaa baddalayo, wa in lagu siiyo sheego 7 cisho kahor ayadooqoraal ah.** Waxa dhici karta in aan loo baahanayn in aad qolkaaga baddashid nafsaddaada ama qof kale si aad ugu qalantid nacfiyada Medicare.

**25. Asturnaanta Xogta.** Waxa aad xaq u leedahay asturnaanta

waxa gaarka ku ah iyo ammaanka xogtaada shakhsiyeed iyo caafimaadeed. Waxa aad oggolaan kartaa ama diidid in aad xogtaada shakhsiyeed iyo caafimaadeed u siidayso qof un ka baxsan rugta waa haddii aadan rug kale u waaregin ama siidaynta xogta uu sharciga shardiyeed ama cid saddexaad qandaraaska lacag bixinta. **Waxaa shardi ah in lagu sheego marka xogta shakhsiyeed uu codsaday qof rugta ka baxsan, iyo in aad adiga dooran kartid qof ku raaca marka xogta ama macluumaadka ay yihiin waxa sababay waraysi shakhsiyeed.**

**26. Cabashooyinka.** Waxa aad xaq u leedahay in aad sheegatid

cabashooyinkaaga iyo sida ugu dhaqsiyo in ay rugtu wax uga qabato xallinta cabashooyinka sida ay ku qoranyihiin nidaamka qoraalka ee rugta cabashooyinkeeda. **Waxa aad caashooyinka u sheegan kartaa iyo ku isbaddalo ku taliso adiga oo xor ka ah xakamayn, faragalin, cagajugleyn, takoorid, ama argudasho, ay ku jirto handadaadda ka saridda rugta.**

Waxa kale ee aad xaq u leedahay in aad cabashooyin ka xareysatid Xafiiska Cabashooyinka Rugta Caafimaadka, Waaxda

Caarimaadka ee Minnesota, ama Sarkaalka Ashtakada Daryeelka Muddada Dheer. Lambarrada cinwaannada iyo telefoonnada waxaa lagu mujiinaya dhammaadka dukumiintigaan.

**27. Adeegyada Ka-jawaabitaanka Wata. Waxa aad xaq u leedahay jawaab degdegsan iyo cagligal lagaa siiyo su'aalahaaga iyo codsiyadaada.**

**28. Faaqidaadda Natijoogyinka Cilmibaarista.** Waxa aad xaq u leedahay in aad eegtid natiijooyinka sahanka ugu dambeeyay ee rugta ka qaadaty sahmiyeyaasha Federaalka ama Gobolka **ama masuuliyiinta caafimaadka degmada** ama qorsha kasta ee saxitaan ah ee rugta dhawraya, in macluumaad laga helo hayadaha metelaya in ay rukunka u doodaan, iyo in la siiyo fursadda hayadahaan lagula xariirayo.

**29. Shaqada.** Waxa aad xaq u leedahay in aad diiddid in aad rugta u shaqaysid.

**30. Warqadaha Boostada.** Waxa aad xaq u leedahay astrunaana xog-isdhaafinta qoran, ay ku jiraan dirista iyo helista warqadaha aan la furayn iyo helitaanka qalab wax lagu qorto, tigidhyada warqadaha iyo qalab wax lagu qoro ee adiga aad iska bixinayso.

**31. Helitaanka Xuquuqda iyo Booqashooyinka.** Waxa aad xaq u leedahay in aad sida ugu dhaqsiyo badan aad si gaar ula xariiri kartid kuwa soo socda:

- Wakiil kasta ee dawladda ka socda;
- Dhakhtarkaaga;
- Sarkaalka ashtakada daryeelka muddada dheer **iyo xaqa aad u leedahay adeegyada difaaca iyo u doodidda;**
- Hay'adaha masuulka ka ah difaacaaga iyo nidaamka u doodidda naafonimada koritaanka ba'an iyo shakhsiyaadka cudurka dhimirka qaba;
- Kharaabadaada ugu sokeysa ama kharaabada kale, marka la eego xuquuqda aad u leedahay in aad diiddid ama kala laabatid oggolaashaha markasta; iyo
- Kuwa kale ee kugu soo booqanaya ee oggolaashahaaga haysta, ay ku jiraan wakiilkaaga, **wakiilka daryeelka caafimaadka, qofka aad u magacawday in uu yahay kharaabadaada xigaha,** iyo shaksi kasta ee ku siinaya adeegyada daryeelka, bulshada, sharciga, ama kuwa kaleba, ee dhawraya xaddidaadyo iyo xaqa aad u leedahay in aad diiddid ama kala laabatid oggolaashahaaga wakhti kasta.

**32. Xog-isdhaafinta Asturan.** Waxa aad xaq u leedahay in aad si qarsoodi ah ula kulantid iyo ula hadashid dadka adiga aad dooratay. **Waxa aad xaq u leedahay in aad rugta ka baxdid haddii aad sidaa rabtid.**

**33. Telefoonka.** Waxa aad xaq u leedahay helitaanka aad si asturan ku isticmaashid telefoon meeshaa oo wacitaannadaada aysan cidina maqlayn.

**34. Hantida Gaarahaaneed.** Waxa aad xaq u leedahay in aad haysatid iyo isticmaashid waxa aad gaarka u leedahay oo ay ku jiraan dayactirka iyo dhar kugu habboon haddii boos loo hayo,

waa haddii aysan wax u dhimayn rukunka xuquuqdiisa, caafimaadkiisa iyo ammaankiisa. **Rugtu waa in ay yeelato maqaasiin dhexe ama qol-qol yar ee la qufuli karo oo aad alaabtada si ammaan leh u dhigan kartid.** Rugtu waxa ay masuul ka tahay in ay si cagligal ah qaaddo tallaabooyhi sida in ay kugula taliso adiga iyo xubnaha qoyskaaga surtogalnimada halista leh in alaabta qofka qaaliga u ah rugta la keeno, damaca ah in magacyo lagu lifaaqo waxa aad leedahay, iyo in uu baaritaan ka dambeeyo marka marka ay wax lumaan ama halaabaan. **Waxaa dhici karta rugtu, balse ku qasbanayn, in ay bixiso qiimaha wixii lumay ama la xaday.**

**35. Degganayaasha Reerka Leh.** Waxa aad xaq u leedahay in ay xaakaaga/seygaaga qolka kula wadaagto haddii sidaa laysku afgarto. **Haddii aad xaasle tahay, waxa aad xaq u leedahay in aad xaakaaga/seygaaaga booqashooyin gaar kuugu yimaadaan.**

## **Dhaqanka Degganaha iyo Ku Dhaqmidda Rugta**

**36. Xakamaynta.** Waxa aad xaq u leedahay in aad xor ka ahaatid xakamayn jireed iyo midda kiimikada ee lagugu sanduuleeyay ujeedooyin dishibliin ama lagula maagay iyo aysan ahayn wax lagu daawaynayo rukunka cudurkiisa, mara laga reebo in si buuxda xaalad degdeg ah lagu diiwaangeliyey, **ama qoraal ahaan uu ku fasaxay dhakhtar sababo qaas ah iyo waqti kooban, iyo marka keliya ee loo baahanayhay in lagugu badbaadiyo si aadan isku dhaawicin ama aadan dad kale u dhawacin.**

**37. Xaqa loo Leeyahay in lagu Codsado iyo Lagu Oggolaado Xakamayn Dhakhtarka ka Socota.** Waxa aad xaq u leedahay in aad codsatid isticmaalka in nafsii ahaan lgu xakameeyo si lagu daaweeyo cudurka ku haya. Kahor inta aan codsigan ugu oggolaan, rugtu waa in ay kuu sharaxdo halista ka imaan karta iyo jiritaanka daawaymo duwan. Dhakhtarkaaga ayaa amaraya xakamaynta, sheegaya daawada cudurka, iyo si qaasa u caddaynaya xaaladaha sababaha isticmaalka xakamaynta. Daawada cudurka waxaa ka mid noqon kara dareen laga qabo ammaankaaga jir ahaaneed, baahi jireed ama mid niyad ee aad qabtid, ama cabsida aad ka qabtid in aad kuftid. Rugta waxa ay korka kala soconaysaa isticmaalka xakamaynta si lagu badbaadiyo caafimaadkaaga iyo ammaankaaga. Kaddib marka lala tashado adiga, qoyskaaga, iyo dhakhtarkaaga, rugtu waxa ay si xilliyeed dib ugu eegaysaa baahida aad xakamaynta u qabtid. Waa in aad foom u saxiimid oggolaashaha xakamaynta. Haddii aad awoodid in go'aamada caafimaadkaaga qaadatid, adiga keliya ayaa codsan kara iyo oggolaan kara xakamaynta. Haddii aadan awoodin, xubin qoyskaaga, ilaaliye, wali, ama wakiilka daryeeka caafimaadka ayaa codsan kara iyo oggolaan kara xakamaynta. [haddii aad doonaysid koobiga sharciyada cusub ee gobolka ee xuquuq ku siinaya, waxa ay ku jirtaa **Xuquuqdaada hoosimaanaysa Bayaanka Xuquuqda Rukunka ee Minnesota (Minnesota Residents Bill of Rights)**, kaaso laga helayo rugtaada. Qof shaqaala ah ayaa kuu sheegi meesha uu yaallo.]

**38. Xadgudubka.** Waxa aad xaq u leedahay in aad xor ka ahaatid xadgudubka qeylada, galmada, jirka, ama maskaxda, in lagu garaaco, iyo adiga oo raalli ka ahayn lagu cidleeyo, **ay ku**



**jirto darxumada sida lagu qeexay Sharciga Difaacaya Dadka Waaweyn ee Baylahan.**

**39. Macaamilada Shaqaalaha ee Rukunka.** Waxa aad xaq u leedahay in shilalka xadgudubka ama dayaca ama dhaawaca ee la ogayn cidda loo sheeganayo la baaro iy tallaabooyinka ku habboonna laga qaado. Waxaa kale ee aad xaq u leedahay in cabashooyin ka xaraysato hayadaha dhammaadka dukumiintigaan ku qoran.

**Xuquuqda Marka Rugta La Galayo, Laga Wareegayo iyo Laga Baxayo**

**40. Ka Wareegidda iyo Ka Bixidda.** Waxa aad xaq u leedahay in aad rugta sii joogtid iyo diiddid in lagaa wareejiyo ama lagaa bixiyo haddii:

1. Ka wareejinta ama ka bixidda tahay wax loogu baahanyahay caafimaadkaaga iyo baahida aad qabtid rugta lagu qancin karin;
2. Ka wareejinta ama ka bixidda tahay wax ku habboon sabab caafimaadkaaga uu fiicnaaday taasoo keeneysa in aadan u baahnayn rugta adeegyadeeda;
3. Ammaanka shakhsiyaadka rugta ku jira ay halis gasho;
4. Caafimaadka shakhsiyaadka rugta ku jira laga yaabo in ay halis gasho;
5. Aad ku guuldarraysatay, kaddib markii lagu siiyay waqti caqligal ah iyo ogeysiisyo lagu siiyaay, in aad bixisid (ama

ay Medicare ama Medicaid kaa bxiyaan) lacagta aad rugta ku joogi lahayd; ama

6. Rugta howshii ay qabanaysday ayay joojisay.

Marka ay rugtu kugu wareejiso ama kaga saarto mid kasta ee ka mid ah xaaladaha (1) illaa (5), xogtaada daawaynta waa in la diwaangeliyo. Diwaangelinta waa in uu dhakhtarkaaga sameeyo marka wareejinta ama ka saaridda loo baahanyahay ay dhacayso sida (1) ama (2) iyo dhakhtar kasta marka wareejinta ama ka saaridda loo baahanyahay ay u dhacayso sida (4).

Kahor inta aysan rug kugu wareejin ama ku saarin, rugtu waa in wargeliso adiga iyo, haddii la yaqaanno, xubin qoyska ama waakiilka rasmiga ee sharciga magacaabay waxa la xarira ka wareejinta ama ka saaridda iyo sababaha, xogta sababaha xogtaada daawaynta ku jira, ay ku jirto ogaysiiska:

(a) Taariikhda ka wareejintaada ama ka saariddaada;

(b) Rugta lagu dhigi doono;

(c) Magaca, cinwaanka, iyo lamabarka telefoonka Gobolka **iyo** sarkaalka baara cabashada shacabka **ee deegaanka**;

(d) Haddii aad naafonimada koritaanka qabtid, lambarka cinwaanka boostada iyo telefoonka hay'adda masuulka ka ah ammaanka iyo u doodidda ee shakhsiyaadka naafonimada koritaanka qaba;

(e) Haddii aad jirrada dhimirka qabtid, lambarka cinwaanka iyo telefoonka hay'adda masuulka ka ammmaanka iyo u doodidda ee shakhsiyaadka jirrada dhimirka qaba;

(f) Magaca iyo cinwaanka xafiiska hay'adda gobolka ee masuul ka ah go'aamada racfaanka ee adiga lagaa wareejinayo ama lagaa saarayo; **iyo**

**(g) War cad in aad adiga leedahay xuquuqda aad kaga dooddid ama racfaan kaga xaraysatid ka wareejinta ama ka saaridda.**

Ogaysiiska ka wareejinta ama ka saaridda waxa lagu gaari karaa sida ugu dhaqsiyo badan ay noqoto sababta (1) illaa (4) ama aadan deggane rugta ka noqon muddo dhan 30 cisho. Xaaladaha kale oo idil, ogaysiiska waa in lagu gaaro muddo ugu yaraan muddo 30 cisho kahor inta aan lagugu wareejin ama lagaa saarin rugta. **Waxa aad dooran kartaa in aad u wareegtid kahor inta aysan muddada ogaysiiska dhammaan. Haddii ay rugtu doorato in ay qol kale kugu wareejiso, waa sidaasi lagugu ogaysiiyo ugu yaraan 7 cisho kahor. Xilliga ogaysiiska waa la soo gaabaniyaa xaaladaha ka baxsan rugta gacanteeda, sida dayactiriida soo gelinta deggane cusub ama isbaddal soo foodsaaray barnaamijka daawadaada ama daawayntaada. Rugaha waxaa laga raba in ay sameeyaan dadaal caqligal ah si lagu dayactiro degganayaal cusub ayadoon wax dhiibata kaga imaan magacaabidyada qolka.**

Waxa aad xaq u leedahay in lagu siiyo waqti kugu filan ee aad isku diyaarinta si lagu hubiyo ammaanka iyo kala dhignaanta ka wareejinta ama ka saaridda rugta.

**41. Ogaysiiska Siyaasadda Sariir-Haynta iyo Dib Ugu Noqoshada.** Haddii isbitaal lagugu wareejiyo ama haddii daawayn aweeg lagu fasaxo, waxa aad xaq u leedahay in aad rugta ku soo laabatid ayado oo la raacayo sharciga sariir-haynta ee qorshaha Gobolka Medicaid (State Medicaid), iyo hoosimaanaya rugta siyasadaheeda la xariira xilliyada siyasadda sariir-haynta haddii aadan haysan Medicaid. Rugta waa in ay ku siiso koobiga siyasadaheeda marka meel kale lagugu wareejinayo ama daawaayn awgeed lagu fasaxayo

Rugta daryeelka waa in dejiso iyo raacdo qoraal siyasad ah ee hoosimaanaya dib u celinta marka ugu horreyso oo ay sariir ka bannaantahay qol qeyb ahaan gaar ah haddii lagaa rabo rugta adeegyadeeda iyo aad mudnaanso u leedahay labada ah Medicare iyo soo dhammaysatay waqtiga isbitaal seexashada ama fasaxa daawaynta ee hoosimaanaya qorshaha Gobolka.

**42. Heelitanka Loogu Simanyahay Tayada Daryeelka.** Rugtu waa in ay dejiso iyo ay leedahay qaanuuno iyo dhaqamo isku mid ah ee la xariira ka wareejinta, ka saaridda, iyo bixiyada adeegyada sida uu qorayo qorshaha Gobolka ee skakhsiyaadka oo idil la xaariira ayadoon la eegayn ilaha lacagta bixinaya. Gobolku shardi kum aha in uu bixiyo adeegyo dheeraad ah ee degganaha ku aaddan aan ahayn adeegyada lagu bixinayo qorshaha Gobolka.

## **Dhinacyo Kale Oo Adkayn Kara Xuquuqdaada**

**Ilaaliyahaaga ama waligaaga ama, marka ay meesha ka maqanyihiin ilaaliyaha ama waliga, qof daneeya, ayaa booskaaga adkayn kara xuquuqyadaan. Qof daneeya waxaa kale ee uu booskaaga ka adkayn karaa xuquuyadaan haddii aad haysatid ilaaliye ama weli ka socda dhinaca agaasinka ka soo geliyeen hayado ama maxkamad xaqiijisa dardaaranka ama maxkamad degmo ee awoodda rasmiga u leh magacaabidda ilaaliyada iyo waliyada. Ka go'aansugidda natijada adkaynta ka horreeyey waxaa dhici karta in rugta daryeelka caafimaadka ay, si daacadnima ah, adeecdo tusmooyinka ilaaliyaha ama waliga. Danta guud ee sharcigaan ayaa ah in xuquuqdaada xornimada madaniga ama midda diinta, ay ku jirto xaqa aad u leedahay go'aamada shakhsiyeed ee madaxabannaan iyo aqoonta loo leeyahay jiritaanka doorashada maclumaadka aan la soo faragalin iyo in ay rugta ku dhiirrigaliso iyo ku caawiso karaankeeda ugu sarreeya iyo ku dhaqangaliso xuquuyadaan.**

## **ILAHA**

### **Sarkaalka Baara Ashtakada Daryeelka Muddada Dheer (Ombudsman for Long-Term Care)**

P.O. Box 64971

St. Paul, MN 55164-0971

(800) 657-3591 ama (651) 431-2555 (magaalada iyo degaannada  
u dhow)

### **Xafiiska Cabashooyinka Rugta Caafimaadka (Office of Health Facility Complaints)**

P.O. Box 64970

St. Paul, MN 55164-0970

(800) 369-7994 ama (651) 201-4201 (magaalada iyo degaannada  
u dhow)

### **Waaxda Caafimaadka ee Minnesota**

#### **Laanta Kormeerka Adeecnaanta (Minnesota Department of Health) (Compliance Monitoring Division)**

P.O. Box 64900

St. Paul, MN 55164-0900

(651) 201-4201

### **Qorshaha U Doodidda Naafada Koritaanka Qorshaha Sharciga Caafimaadka Dhimirka (The Developmentally Disabled Advocacy Project) (The Mental Health Law Project)**

430 First Avenue North, Suite 300

Minneapolis, MN 55401-1780

(800) 292-4150 ama (612) 332-1441 (magaalada iyo degaannada  
u dhow)



## **Guddiga Hawlaha Caafimaadka**

**(Board of Medical Practice)**

2829 University Avenue SE, Suite 400

Minneapolis, MN 55414-3246

(612) 617-2130

## **Adeegyada Dabagalka & Dib u Eegitaanka Sharafta**

**(Khayaanda iyo Ku Xagdugubka Medicaid - arrimaha lacag bixinta quseeya)**

**Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota**

P.O. Box 64982

St. Paul, MN 55164-0982

(800) 657-3750 ama (651) 431-2650 (magaalada iyo degaannada u dhow)

[Waa in aad fariin ku reebtid.]

**Qoraalka waxaa bixiyay Waaxda Caafimaadka iyo Dalladda**

**Guriyeynta. Tarjumaadda waxaa bixisay Waaxda**

**Caafimaadka ee Minnesota. Macluumaad dheeraad ah ee**

**turjumkaan ku saabsan, fadlan kala soo xariir Waaxda**

**Caafimaadka ee Minnesota ee laga helayo (651) 201-3701.**